Rayaale muxuu kaga jawaabey balan-qaadyada baaqdey?

Thursday, 04 June 2009

Burco(Geeska) - Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland Md Daahir Rayaale Kaahin ayaa markii ugu horeysay muddo ku siman Todoba sanadood shalay booqdey magaalada Burco ee xarunta gobolka Togdheer.

Waftiga Madaxweynaha oo ay weheliyaan raxan ka tirsan Golahiisa wasiirada. Taliyaha Ciidanka Bilayska iyo Masuuliyiin sar sare oo ka tirsan xukuumadiisa, waxa duleedka Magaalada Burco ku soo dhaweeyay qaar ka mid ah dadweynaha ku dhaqan Magalaada Burco, Arday iyo dhamaan shaqaalaha laamaha dawlada ee Gobolka Togdheer.

Sida uu ku soo waramayo Wariyaha wargeyska Geeska Afrika ee magaalada Burco Cabdisalaam Maxamuud, Madaxweyne Rayaale waxa uu mahadceliyay dadweynahii soo dhaweeyay waxaana uu ujeedada safarkiisa ku sheegay xogo-gaal u noqoshada xaalada gobolada dalka, “Booqashadaydu waxay ku salaysantahay in aan xog-ogaal u noqdo xaalada ay ku sugan yihiin dadku, adeega bulsho halka uu maraayo iyo xaaladooda guud ahaan deegaamada uu ka kooban yahay dalku, gobolkii koowaad(Saaxil) saaka (shalay) ayaan soo dhammeeyay, gobolkii labaad oo ah Tog-dheer ayaan marayaa kuwa kalena inshaalaahu waan wada mari doonaa,”Sidaas ayuu yidhi Madaxweynaha Somaliland Md. Daahir Rayaale Kaahin oo markii uu gaadhay Magaalada Burco la weydiiyay ujeedada socdaalkiisa.

Madaxweynaha Somaliland iyo xukuumaddiisa waxa ay xisbiyadda mucaaradka ahi ku tiriyaan mid aan haba-yaraatee fullin balan-qaadyada ay dadweynaha u jeediyaan, Islamarkaana waxa ka mid ah qodobada tusaalaha loo soo qaato warshadda shamiitadda Berbera oo uu sanado ka hor dhagax-dhigay. Sidaa darteed, su’aal BBC-du ka weydiisay, jawaabta uu u hayo filashadii dadweynaha ee dhinaca mashaariicda horumarinta sida dhismaha jid isku xidha Itoobiya iyo Dekeda Berbera iyo arrimo kale waxa uu kaga jawaabey oo uu yidhi. “Horta, wax gaar ah oo aan gobolka Saaxil u balan-qaaday ma jirto, dawlada awoodeeda waad og-tahay, idaacadaha malaa waad ka dhegaysatay dawladeenu dawladihii hore way ka itaal yar tahay. Laakiin, markaan qiimeeyay haddana inaan ka tayo fiican nahay ayaan soo ogaadoo, meel kastaba xarun caafimaad (MCH) iyo iskuul baan ka dhisnay aanay dawladihii hore ka dhisin,” Waxaanu intaasi ku daray, “Dawladu kolba awoodeeda ayay wax qabanaysaa, dedaalkana waan ku jirnaa haddii aanu mashaariic u helo, Wershada Sibidhka Berbera in kasta oo aanan saaka ka hadlin rag muwaadiniin ah oo wershadii hore ee sibidhka aanu samayno leh ayaa jiray, waan u fasaxaynaa wixii kale ee aynu cid kale ka helana waanu ku dari doonaa haddii alle yidhaahdo.”

Md. Rayaale oo la weydiiyay halka uu ku dambeeyay balan qaadkii hore ee xukuumadu ku sheegtay inay lacagta giimbaarta ah kaga bedalayso magaalada Burco, waxa uu yidhi“Lacagtaasi (Giimbaartu) waa aafo qaran, dedaalkeeda waan wadnaa, Inshaalaahuna Burco maalin aanu ka bedelno lacagtaasi oo aan fogayn ayaa iman doonta.”

Madaxweyne Kaahin, waxa la sii weydiiyey waxa uu u wado goboladii dhawaan uu magaacay ee Saraar, Oodweyne iyo Buuhoodle. “Awooda dawladu kolba inteeda ayay socon doontaa,”Ayuu ku gaabsaday.

Sidoo kale, waxa Madaxweyne Rayaale la weydiiyay waxa uu ka qabo Tuhumo ku xeeran safarkiisan oo la xidhiidha in uu ku jiro Olole siyaasadeed oo uu ugu jiro doorashada Madaxtooyada ee la filayo bisha 9-aad“Maya kaambayn

weli lama gaadhin, kaambayna kama hadlayo ee hawshaydii waajibka igu ahayd ayaan gudanayaa oo dadkayga aan xog-ogaal u noqdo, Anigoo Madaxweyne ah ayaan gudanayaa, maxaa u qabsoomay, maxaa u dhiman iyo halka lagu socdo.”Sidaas ayuu yidhi.

Waxa jira abaaro baahsan oo mudooyinkii ugu danbeeyey ka jiray Gobolada dalka, sidaa darteed waxa la weydiiyey Madaxweynaha waxa ay dawlad ahaan ka qabanayaan abaaraha waxana uu kaga jawaabay oo uu yidhi. “Walaahi WFP waanu wada hadalnay in gurmad deg deg ah dadkaasi abaaruhu hayayaan loo keeno cunto iyo wax alle iyo wixii loo awoodi karayo,”Ayuu yidhi.

Dhinaca kale, Madaxweyne Rayaale, waxa uu shalay ilaa xalay kullamo la yeeshay dhinacyo kala duwan oo u badan shaqaalaqa laamaha dawlada ee gobolka Togdheer. Gudoomiyaha gobolka Togdheer Jaamac Cabdilaahi Biin oo aanu xalay khadka Is-gaadhsiinta wax kaga weydiinay kulamadaasi. “Cid kale lamuu kulmin, shaqaalihii laamaha dawlada ayuu ku ekaa Madaxweynuhu oo uu mid kasta qaybtiisa warbixin ka dhageystay…Anigu maadaama oo aan gudoomiyihii ahay warbixin guud ayuunbaan ka bixiyay xaalada.” Sidaas ayuu yidhi gudoomiyaha Togdheer.

Md, Biin waxa aanu weydiinay, ka sokow Dhageysiga warbixinaha wax jawaab ah oo dhinaca Madaxweynaha kaga soo noqotey, waxaana uu ku gaabsaday oo uu yidhi gudoomiyuhu. “Wixii ay qabteen (laamaha dawladuna) wuu ku hanbal-yeeyey, wixii dhiman waxa uu soo jeediyey in wixii laga qaban karro laga qabto oo dadka loo shaqeeyo.”

Gudoomiyaha Gobolka Togdheer waxa uu sheegay in aanu hayn wakhti sugan oo qorshaha Madaxweynuhu yahay inuu ku sugnaado Gobolkaas, balse waxa uu sheegay in uu soo wadda mari doono dhamaan Togdheer.

Safarkan Madaxweynaha ee Burco ayaa ah kii ugu horeeyay ee uu ku Tago xarunta gobolka Togdheer ee Burco tan iyo intii loo doortay Jagada Madaxweyneha 2003

Dadkweynaha magaalada Burco ayaana aragtiyo kala duwan ka muujiyay safarkan. Iyadoo bulshada qaarkeed ku macneysay in socdaalkani uu horseed u yahay olalaha dooraashada madaxtooyada, halka dadka qaarna aaminsan yihiin in uu yahay Madaxweyne shaqadiisa gudanaya.

Source: www.geeska.net, Wargeyska Geeska Afrika, Hargeysa